Helsinki

# Ku soo dhowow cuntaynta xagaaga ee jardiinooyinka ciyaarta

## Waxqabadka jardiinada ciyaartu waa lacag la’aan!



# Jardiinada ciyaarta ee Helsinki

waxaay u dhowyihiin qoysaska, waxaayna ku kala yallaan magaalada dhinacyadeeda kale. Shabakad 70 jardiino ciyaareed iyo dhismeyaasha xarumaha qoyska ayaa ka samaysa, waxaayna ku yaallaan meelo si fudud gaadiidka dadwaynaha looga soo raaci karo. Jardiinada ciyaartu waxaay u suuro galiyaan qoysaska dhallaanka yar iyo carruurta haysta iyo dugsileydaba meelo ammaan ah oo ay ku ciyaari karaan. Jardiinada ciyaarta waxaa lagu qabanqaabiyaa waxqabad gudaha iyo bannaankaba ka dhaca oo noocyo badan oo la hago looguna talo galay qoysaska dhallaanka yar iyo carruurta haysta iyo dugsileyda. Badanaa jardiinooyinka ciyaarta waxaa ku yaalla saxamada biyaha ee wakhtiga xagaaga laysku qaboojiyo, meelo gudaha lagu ciyaari karo iyo biraha la koro ee ciyaarta. Jardiinooyinka ciyaartu waxaay furanyihiin maalmaha shaqada muddada u dhaxeysa 9-17. Wakhtiyada ay furanyihiin isbaddal yar ayaay yeelan karaan.

# Macluumaad dheeraad ah

- hel.fi/leikkipuistot
- hel.fi/helsinki/fi/tapahtumakalenteri
- bogagga Facebook iyo Instagram ee jardiinooyinka ciyaarta
- sabuuradaha ogaysiiska ee jardiinooyinka ciyaarta

Ku soo dajiso taleefankaaga aaladda Leikkipuisto ee bilaashka ah ee aad ka heli karto dhammaan jardiinooyinka ciyaartu meelaha ay khaaridada ka yaallaan iyo macluumaadka khuseeya qalabka ciyaarta, goobaha iyo waxqabadka.



## Waxqabadka ku socda qoysaska carruurta iyo dhallaanka haysta

Wakhtiyada ay wadaagaan carruurta iyo waalidku, muusig tumista iyo heesaha, farshaxanka, ciyaarta, jimicsiga iyo wadajooga. Barqadii waxaa qoysaska loo qaban qaabiyaa waxqabadyo la hagayo. Jardiinada ciyaarta waxey waalidku fursad ugu helayaan in ay isbartaan qoysas kale oo carruur leh carruurtuna waxey ka helayaan saaxiibo ay la ciyaaraan.

## Naadiyada

2–4 jirrada naadiyada loogu talo galay ee barbaarin-horaadka furan ah oo lacag la'aan ah waxaay isku yimaadaan dhowr saac markiiba 2–3 mar toddobaadkii. Naadiga wuxuu ilmuhu ku helayaa fursad uu ku dareemo inuu koox ka tirsanyahay iyo fursad waxqabad tarbiyadeed oo tayo leh, bannaanka inuu ku ciyaaro, iyo dhaqdhaqaaq uu ku helo ciyaar iyo farshaxan.

## Hagitaanka qoysaska dhallaanka leh

Jardiinooyinka ciyaartu waxaay qabanqaabiyaan hagitaan qoysaska dhallaanka leh ku socda oo loogu daro tababarka qoyska.
Hagitaanka qoyska dhallaanka leh waxaa lagu qaataa saddex kulan:

- Si wadajir ah dhallaanka mid loola qaato oo looga hadlo isla falgalka wakhtiga hore
- Kabitaan dhanka awoodda ah oo nolosha maalinlaha ah iyo waalidnimada
- Jadwalka maalinlaha ah ee dhallaanka

Kulamadu waa kuwo goob kasta oo loo tago isku wax ka kooban

## Kafateeriyada -maanta ayaan kulmaynaa

Kafeteeriyada maanta ayaan kulmaynaa waxaay horumarisaa isla kulanka qoysaska luqadaha iyo dhaqamada kala duwan ka soo jeeda iyo in lagu sheekaysto af finnish oo wakhti lagu qaato jawi deggan oo raaxo leh. Dadka waawayn way isku bartaan carruurtuna waxaay ku helaan asxaab ay la ciyaaraan.

## Guryaha qoysaska

Guryaha qoyska waxaa lagu qabanqaabiyaa wax-qabad noocyo badan, koorso iyo kooxax loogu talo galay waalidka iyo carruurta oo jira subaxdii iyo galabtii.

## Waxqabadka galabtii ee waxbarashada dugsiga hoose-dhexe

Waxqabadka galabtii ee waxbarashada dugsiga hoose-dhexe waxaa lagu qabanqaabiyaa wax-qabad galabtii ah oo loogu talo galay ardeyda fasalka 1.-2. ee qaata taageerada baahida gaarka ah. Waxqabadka galabtii waxaa ilmaha lagu siiyaa waxqabadka xiiso leh oo goob ammaan ah uu ku heli karo marka maalinta dugsigu ay u dham-maato. Waxqabadka galabtii waa mid lacag laga bixiyo si gaar ah ayaana loo codsadaa waxaana lagu helaa casariye iyo caymis.

## Waxqabadka dugsileyda ku socda ee wakhtiyada fasaxa ah

Wakhtiyada fasaxyada ee dugsileyda ee deyrta, krismaska, jiilaalka iyo xagaaga waxaay jar-diinada ciyaartu u qabanqaabiyaan dugsileyda hagitaan furan oo lacag la'aan ah waxaayna jardiinooyinkayaga ciyaarta qaarkood leeyihiin waxqabad dalxiisyo maalinle ah.

## Xagaaga jardiinada ciyaarta

Jardiinooyinka ciyaarta ee Helsinki waxaa xagaagii loogu qabanqaabiyaa qoysaska carru-urta leh iyo dugsileyda waxqabad noocyo badan oo wanaagsan, waxqabad la hagay iyo munaa-sabado kala duwan oo nawaaxi ammaan ah ay carruurtu ku helaan. Cuntada xagaaga ee lacag la'aanta ah waxaa la siiyaa ilmaha 16 sano jirka ka yar. Shaqaalaha jardiinooyinka ciyaartu waxaay u joogaan inay u adeegaan qoysaska iyo carru-urta. Jardiinooyinka ciyaartu waxaay furanyihiin maalmaha shaqada, waxqabadku waa lacag la'aan, umana baahna qofku inuu iska diwaan galiyo.




”Waa wax aad u fiican markuu ilmahayaga yar ee dugsiga dhigta ee galbihiisa ku qaadan karo jardiinada ciyaarta ah ee noo dhow ee ammaanka ah.”

”Waxaan goobta jardiinada ciyaarta u kireysanay inaan ku qabsano xafladda dhalasho ee ilmaha. Kharashkiisu wuu yaraa, waxaanan ka fursanay inaan ka walwalno nadaafinta guriga. Waxaa wanaagsan in jardiinada ciyaarta macluumaad dheeraad ah la sii waydiiyo.”

”Jardiinada ciyaartu waa meesha aan ku baxsano ee an wakhti ku qaadano.”

Helsinki